# Soo bandhigidda $15 maalintii daryeelka ilmaha ee qoysaska

Janaayo 30, 2025 Su'aalaha warbaahinta

## Alberta waxay soo bandhigeysaa lacagta go'an ee waalidka ee bishii oo ah $ 326.25 oo loogu talagalay daryeelka ilmaha ruqsada leh ee maalinta oo dhan, ama qiyaastii $ 15 maalintii.

Iyadoo qayb ka ah $ 3.8-bilyan oo Heshiiska Barashada Hore iyo Daryeelka Ilmaha ee Canada-Alberta Canada-Wide, Alberta waxay taageeraysaa qoysaska si ay u helaan daryeel ilme oo la awoodi karo oo ku baahsan gobolka oo dhan iyada oo ay dooranayaan bixiyaha ay rabaan.

Laga bilaabo Abriil 1, waalidiinta carruurta da'doodu tahay laga bilaabo eber ilaa da'da dugsiga barbaarinta ee aada xarumaha xanaano maalmeedka ruqsada leh ee maalintii oo dhan ah iyo barnaamijyada xanaano maalmeedka qoyska ee gobolka oo dhan waxay xaq u yeelan doonaan lacagta waalidka ee go'an oo ah $326.25 bishii, ama qiyaastii $15 maalintii. Waalidiinta u baahan daryeelka maalinta gallinkeeda waxay bixin doonaan $230 bishii.

Si loo taageero isbeddeladan iyo daryeelka ilmaha oo tayo sare leh, qiyaastii boqolkiiba 85 ee bixiyeyaasha xanaano maalmeedyada ruqsada haysta ayaa heli doona kordhin maalgelin marka qaab-dhismeedka lacagta ee cusub uu hirgalo Abriil 1.

Maalin kasta, waalidiinta iyo qoysaska ku kala baahsan Alberta waxay ku tiirsan yihiin bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee ruqsada leh si ay u caawiyaan koritaanka iyo koboca carruurtooda inta ay shaqo ama dugsi aadayaan. Bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee ruqsada haysta iyo barayaasha carruurnimada hore waxay door muhiim ah ka ciyaaraan sidii ay carruurta uga caawin lahaayeen inay dhistaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay uga caawiyaan koritaankooda iyo caafimaadka guud ahaanba. Maaddaama ay sii kordhayaan dadka reer Alberta, baahida loo qabo daryeelka ilmaha oo tayo sare leh, la awoodi karo, lana heli karo, ruqsad haysta oo la xakamayn karo ayaa sii kordhaysa.

Inkastoo Alberta ay horey u yaraysay lacagaha waalidka ilaa celcelis ahaan $15 maalintii Janaayo 2024, qoysas badan ayaa wali bixinaya lacag intaas ka badan iyadoo ku xiran meesha ay ku nool yihiin, da'da ilmahooga iyo bixiyaha daryeelka ilmaha ee ay doortaan,

taas oo horseedday sugnaan la'aan iyo wareer. Qoysas badan ayaa waxaa ku adag inay qiyaasaan lacagaha daryeelka ilmaha haddii ay soo guuraan ama ay beddelaan bixiyayaasha, daryeelayaashuna waxay walaac ka muujiyeen cadaaladda iyo kakanaanta qaab-dhismeedka maalgelinta ee hadda.

Kharashka bil kasta waxay bixin doontaa daah-furnaan iyo inay saadaalin karaan qoysaska ku nool qayb kasta oo ka mid ah gobolka iyadoo sidoo kale hagaajinaysa caddaaladda bixiyayaasha oo kordhinaysa waxtarka guud ee nidaamka. Iyadoo wakiil ka ah qoysaska, dawladda Alberta waxay dabooli doontaa qiyaastii boqolkiiba 80 kharashka daryeelka ilmaha iyada oo u maraysa deeqaha la siiyo xarumaha xanaano maalmeedka iyo guryaha maalintii ee qoysaska.

Tani waxay ka dhigan tahay in qoyskii isticmaala xanaano maaliyeed waqti buuxa ah uu celcelis ahaan ilmihiiba ka tashiilan karo $11,000 sanadkiiba. Kharashka go'an ee waalidka ee bishii waxay hubin doontaa in daryeelka ilmaha uu yahay mid u qiimo jaban dhammaan dadka oo dhan iyo in bixiyayaasha looga magdhabo adeegyada muhiimka ah ee ay bixiyaan.

Si ka soo horjeedo kharashka waalidka bishiiba, dawladda Alberta waxay magdhaw u siin doontaa dugi-horraadyada illaa $100 bishiiba ilmihiiba iyagoo ka wakiil ah waalidiinta, iyadoo marka hore ahayd $75.

"Dadka reer Alberta waa ay mudan yihiin fursado ay ku heli karaan daryeelka ilmaha oo jaban, meel kasta oo ay joogaan ama nooca daryeelka ah ee u shaqeeyo iyadoon la eegin. Waxaanu keenaynaa kharashka go'an ee waalidka ee qoysaska si ay dhamaantood u helaan daryeel ilme oo tayo sare leh, ayna u heli karaan khidmo isku mid ah oo la awoodi karo, oo la saadaalin karo."

*Matta Jonses, Wasiirka Shaqooyinka, Dhaqaalaha iyo Ganacsiga*

"Yaraynta kharashka daryeelka ilmaha waxay nolosha ka dhigtaa mid qoysaska noloshooda wax ka tarta, waxayna siisaa xorriyad ay ku samaystaan doorashooyin u shaqeeya-hadday yihiin kuwo shaqaynaya, wax baranaya iyo kuwa korinaya qoysaskooda. Waxaan sii wadi doonnaa ka shaqaynta sidii aan kharashka hoos ugu soo dhigi lahayn, aan u abuuri lahayn boosas badan, oo aan u yarayn lahayn liiska sugitaanada qoysaska ku nool Alberta iyo dalka oo dhan, iyada oon xaqiijineyno in ilme kastaa uu helo bilowga ugu fiican nolosha."

*Jenna Sudds, wasiirka federaalka ee Qoysaska, Carruurta, iyo Horumarinta Bulshada*

Si nidaamka daryeelka ilmaha ee Alberta looga dhigo mid u qiimo jaban dhammaan qoysaska, fiiga waalidka bishii ee go'an waxa uu bedelayaa Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee carruurta da'doodu tahay da'da eber ilaa da'da dugsiga barbaarinta ee aada daryeelka ilmaha saacadaha caadiga ah ee dugsiga. Kaalmada carruurta aadda xannaanada dugsiga ka baxsan isma isbeddelayso.

Maaddaama gobolka u gudubayo kharashka waalidka ee go'aan ee cusub, bixiyayaasha daryeelka ilmaha waxay lahaan doonaan dabacsanaan ay ku bixiyaan adeegyo ikhtiyaari ah oo loogu talagalay kharash dheeraad ah oo kab ah oo waalidka ah. Adeegyadan ikhtiyaariga ahi waa inay ahaadaan kuwo ka badan wixii ka sarreeya adeegyada la siiyo dhammaan carruurta ku jira barnaamijyada daryeelka ilmaha ee gaar-gaarka ah. Shuruudo cadcad ayaa la hirgalin doonaa si bixiyeyaasha ay uga hortagaan helitaanka daryeelka ilmaha ee rabitaanka ku xiran oo ku aaddan qoysaska doorbidaya inay bixiyaan lacagta adeegyo ikhtiyaari ah.

## Xarig ka jaridda iyo taageeridda bixiyayaasha daryeelka ilmaha

Iyadoo u guuraysa kharashka waalidka bishiiba ee go'an, dowladda Alberta ayaa sii wadeysa u wareegidda nidaamka daryeelka ilmaha ee ay dawladdu maalgeliso. Si loo taageero daryeelka ilmaha oo tayo sare leh, qiyaastii boqolkiiba 85 ee bixiyayaasha xanaano maalmeedyada ruqsadda haysta ayaa heli doona kordhinta maalgelinta marka qaab-dhismeedka cusubi uu hirgalo Abriil 1.
Gobolku wuxuu xoojinayaa nidaamka si loo hagaajiyo habka sheegashada daryeelka ilmaha ee loo isticmaalayo in loogu magdhabo bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee ruqsadda leh iyagoo ka wakiil ah waalidiinta Alberta. Dawladda Alberta ayaa sidoo kale meelmarinaysa xalal teknoolojiyadeed si loo yareeyo culayska maamulka iyo shuruudo ee muhiimka ahayn.

## Ka sii baaraandegidda

Sannadka ugu dambeeya ee heshiiska federaalka, dawladda Alberta waxay ka shaqeyneysaa inay taageerto nidaamka daryeelka ilmaha iyada oo isku diyaarineysa inay ka wada xaajooto muddada xigta ee heshiiska, taas oo ka tarjumeysa baahiyaha dadka reer Alberta iyo bixiyeyaasha. Alberta waxay ku biiraysaa saaxiibadeeda gobol iyo dhuleed ee dalka oo dhan oo ku baaqaya nidaam waara, oo si ku filan loo maalgeliyo oo u shaqeeya waalidiinta iyo bixiyayaasha muddada fog.

## Xaqiiqooyin kooban

- Iyada oo la raacayo shuruudaha hoos yimaada Heshiiska Barashada Hore iyo Daryeelka Ilmaha ee Canada-Alberta Canada-Wide, fiiga waalidka bishii ee

go'an wuxuu kaliya khuseeyaa caruurta da'da eber ilaa da'da dugsiga barbaarinta ee u baahan daryeel inta lagu jiro saacadaha dugsiga ee caadiga ah.

- Carruurta aada 100 saacadood ama ka badan bishii ayaa loo arkaa maalinta oo dhan, waalidkuna bishii waxay bixinayaan $326.25. Carruurta aada inta u dhaxaysa 50 ilaa 99 saacadood waxaa loo arkaa maalin barkeed, waalidkuna waxay bixinayaan bishii $230.
- Qoysaska leh carruurta aada xanaanada dugsiga ka horeysa illaa afar saacadood maalintii waxay heli karaan ilaa $100 bishiiba.
- Ma jiraan wax laga beddelayo Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee dugsiga ka baxsan ee loogu talagalay carruurta u baahan daryeel ka baxsan saacadaha dugsiga ee fasalada 1 ilaa 6 ee aada dugsiga barbaarinta ee maalinta oo dhan ah.
- Barnaamijyadu waxay dooran karaan inay bixiyaan adeegyo ikhtiyaari ah oo loogu talagalay fiiga dheeraadka ah. Waxa tusaale ahaan noqon kara gaadiidka, safarada duurka iyo cuntada. Barnaamijyada daryeelka ilmaha loogama baahna inay waalidka saaraan lacag kab ah oo dheeraad ah.

## Macluumaadka la xidhiidha

- Heshiishka daryeelka ilmaha ee federaalka-goboleed

## Wararka la xiriira

- Alberta waxay xoojisaa badbaadada daryeelka ilmaha (Oktoobar 30, 2024)

## Su'aalaha warbaahinta


### Marisa Breeze

780-235-4427
Xoghaynta Saxaafada, Shaqooyinka, Dhaqaalaha iyo Ganacsiga